

## Heshiiskii Kenya iyo Soomaaliya

Tan iyo markii la baahiyey warka ku saabsan 'Khilaaf Xuduud badeed' Kenya iyo Soomaaliya kala saxiixdeen 7dii April 2009, waxaa hal mar isla oogsaday dareenka, gudo iyo dibad, dadka Soomaaliyeed. Waxaa abuurmay, welina taagan shaki ku saabsan waxa Dwaladda Federaalka KMG ah ku xambaaray in ay qayb ka noqoto Heshiis noocaan ah!?

Weli inooma cadda jawaabta, waxaase muuqata in lagu baraarugay in arrin aan hore loo sii ogeyn, waxaana laga yaa-baa in aan sidaas loo wada fahmeen, haddii ayan Mareegta Somalitalk.com soo bandhigteen Cilmi baarista ballaaran ee ay arrintaas ka diyaarsheen, waqti aad uga sii horreeyey xilliga dawladda Federaalka KMG ahi la saxiixanayso Kenya waxa loogu yeeray 'Heshiis Isfaham ee Khilaaf Xuduud badeed'.

Warbixinta Somalitalk.com soo bandhigtay, kana digaysa in badda Soomaaliya ay ku socoto kala iibsi, waxay daaha ka qaaddaysaa xog muhiim ah oo ay ka mid tahay:

- In ugu dambeys 13ka May 2009, Guddiga Qaramada Midoobay ugu xilsaaran Badaha, uu dalalka xuduud badeed leh, ka sugayo in ay soo gudbiyaan xadka baddooda,
- Waxaa ujeedadu tahay in masaafo dhan 150 Nautical miles loogu kordhiyo xadka gaarka ah ee Zone-badeedka dalalkaas, halkii markii hore uu ka ahaa 200 Nautical miles
- waa inta u dhexeysa xariiqa gaduudan iyo kan jaalaha ah
- ee biyaha Soomaaliya, isku noqonaya 350 Nautical miles (akhri Mabkan).


- Iyadoo taas maanka ku haysa, dawladda Kenya waxay gudubsatay halka xuduuddeeda badeed ay dhacdo, waxaana sida mabka ka muuqata ay kaga darsadeen dhul badeed baaxaddiisu dhan tahay 38,000km<sup>2</sup> ee badda Soomaaliya. Madaxweynaha Kenya wuxuu saxiixay Dikereeto, 22kii July 2005, laguna baahiyey faafinta rasmiga ah ee dawladda (Kenya Gazette, No. 55), waxaa ku qoran cabbirro iyo khariidad si cad u muujinaya in Kenya ay si bareer ah u cabbiratay dhul-badeedka Soomaalida.

### Cabirka Badda Kenya qaadatay



Markaas, sida ay muujinayaan qoraallo Somalitalk soo bandhigtay, waxay cilmi baarsitooda iyo welwelkooda u gudbiyeen Dawladda Soomaaliyeed ee KMG ah, intii usaan dhicin Heshiiska la kala saxiixday 7dii Abriil 09. Haddaba, waxaa isweydiintu tahay:-

1. Dawladda Federaalka KMG ahi ma iyadoo xogtaas heshay, miyey Heshiiska saxiixday?
2. Markaasna ay oggolaatay in Soomaaliya iyo Kenya uu jiro muran xagga xuduudda badda ah?
3. Goorma ayey soo baxday, dalwadduna ogaatay in Kenya xad badeed ku sheeganayso Soomaaliya?
4. Goobta Heshiisku ka dhacay ee Xarunta Wasaaradda Arrinmaha Dibedda ee Dawladda Kenya, Cabdiraxmaan Cabdisahakuur Wasiirkeenna yaa dhanka Soomaaliya ku weheliyey waqtiga kala saxiixashada? *Eeg bogga 2aad*



Waa inta u dhexeysa xariiqa gaduudan iyo kan jaalaha ah ee biyaha Soomaaliya oo isku ah 350 Nautical miles (akhri Mabka sare).



Saxiixa Heshiiska Soohdin-badeedka Kenya iyo Soomaalia -7Abriil 2009

20th Anniversary Hillsborough disaster remembered on 15th April 2009